



Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

WAR-SAXAAFADEED

Sabti, Abriil 4, 2020

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay si aad ah uga xun tahay kufsiga loo geystay seddex carruur ah oo da'dooda kala tahay seddex jir iyo afar sano jir, kuwaas oo dhibka loogu geystay degmada Afgooye ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed intii u dhaxeysay 30-ka illaa 31-ka Maarso 2020, halka gabar jirto 7 sano oo ku sugnayd deegaanka Balanballe ee Dowlad Goboleedka Galmudug lagula kacay fal kufsi ah 20kii Maarso 2020.

Wasaaraddu waxay si xoog leh u cambaareyneysaa falalkaas foosha xun, ayadoo ku nuuxnuuxsatay in ficilladani ay ka hor imaanayaan mabaadii'da Islaamka, Dastuurkeenna ku meel gaarka ah iyo xeerka *Biri ma geydada* Soomaaliyeed. Tani waxay mar kale bannaanka soo dhigeysaa u nuglaanshaha carruurta, gabdhaha iyo haweenka ee dhibaataada ku saleysan jinsiga.

Wasiir Deqa Yaasiin waxay tiri: "Waxaan ugu baaqeynaa qof walba inuu ixtiraamo dhowr-sanaanta iyo sharafta dhibbanayaasha iyo qoysaskooda, kana fogaado dambi la xiriira sheegitaanka magacyadooda iyo in sawirradooda lagu faafiyo meel kasta oo ay ku jiraan warbaahinta bulshada, sababtoo ah waxay wax u dhibi karaan dambi-baarista socoto iyo in mustaqbalka dacwad ciqaabeed la soo oogo, ayadoo sidoo kale sababi kara in ay ka horjoogsadaan dhibbanayaasha inay si caadi ah oo ceeb ka madaxbannaan u noolaadaan."

Dowladda Federaalka waxaa mar walba ka go'an ciribtirka dambiyada ciqaab la'aanta ee xadgudubka galmada iyada oo hubineysa in dhammaan dambiilayaasha la marsiiyo ciqaabta ay mudan yihiin. Wasaaraddu waxay si dhow ula shaqaysaa xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka si caddaaladda loo horkeeno kuwii falalkaan geystay, waxayna xiriir dhow la leedahay qoysaska dhibbanayaasha si loo siiyo taageerada ay u baahan yihiin.

Waxaan ka codsaneynaa qof walba inuu ku soo wargeliyo dhammaan kiisaska xadgudubyada ee galmada ciidanka Booliiska ama Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, kuwaas oo ah halka ugu horreysa ee wax looga qabanayo halista isla xisaabtan la'aanta. Wasaaradda ayaa hoosta ka xariiqaysa baahida loo qabo in si deg deg ah loo meel mariyo Hindise Sharciyeedka Dembiyada Jinsiga oo hadda horyaalla Baarlamaanka Federaalka.

DHAMMAAD

Wixi tafaasiil dheeraad ah, kala xiriir:

Axmed Cilmi

E-mail: ahmed.elmie@gmail.com